

Apple Health Expansion

Su'aalaha Soo Noqnoqda

Su'aalahan Soo Noqnoqda (FAQ) ee soo socda waxay bixiyaan macluumaad loogu talagalay macaamiisha Apple Health Expansion suuragalka ah iyo kuwa caawiya. Eeg [Apple Health Expansion mareegaha](#) si aad wax badan uga oggaato.

Waa maxay Apple Health Expansion

Maamulka Daryeelka Caafimaad (HCA) ayaa wuxuu ballaariyay Apple Health xaq-u-yeelashada dadka waaweyn, iyadoo aan la eegayn xaaladda socdaalka. Barnaamijkan cusub waxaa loo yaqaanaa Apple Health Expansion waxaanna daaha laga rogey 1 da Luulyo, 2024. Apple Health Expansion wuxuu caymis siin doonnaa shakhsiyaadka ay da'doodu tahay 19 iyo kuwa ka weyn ee aan xaq u lahayn barnaamijyada Apple Health kale. Barnaamijka cusub, ilaa iyo xadka ay fureen laanta Sharci-dejinta, waxaa loogu talagalay in uu bidhaamiyo adeegyada loo fidiyey shakhsiyaadka ku qoran Apple Health (Medicaid) daryeelka la maareeyo.

Isqoritaanka iyo xaq-u-yeelashada

Kumaa xaq u leh?

Waxaad xaq u yeellan kartaa barnaamijkan haddii aad:

- Tahay qof Washington deggan oo da'diisu tahay 19 ama ka weyn,
- Leedahay dakhli la xisaabi karo oo gaaraya ilaa 138% ee heerka saboolnimada federaalka,
- Aadan xaq u lahayn barnaamijyada Apple Health kale ee ku saleysan xaaladda socdaalka,
 - Haddii aad tahay muhaajir aan buuxin muddada sugitaanka shanta-sano si aad xaq ugu yeelato Apple Health xaq uma yeellan doontid Apple Health Expansion. Tani waxaa sabab u ah in aad leedahay xaalad socdaal oo kaa dhigayso in aad xaq u yeelato canshuur dhaaf loo marayo *Washington Healthplanfinder*. Shakhsiyaadka aan sharciga haysan waxay xaq u leeyihiin caymis.
- Aadan uur lahayn ama aadan lahayn uur dhammaaday 12-kii bilood ee la soo dhaafay, iyo
- Aadan xaq u lahayn qorsheyaasha qualified health plans (QHP) oo leh canshuur dhaafka lacagta joogtada ah ee caymiska ee horumarsan (APTC) ama barnaamijyada gargaarka caafimaadka ee ay dowladda federaalku maalgeliso.

Wax ka ogow xaq-u-yeelashada barnaamijyada Apple Health kale hca.wa.gov/apple-health-eligibility.

Maxaa dhacaya haddii aan hadda caymis codsado maadaama xadka isqoritaanka laga soo baxay?

Haddii aad caymis codsatey laguuna diiday iyadoo sababtu tahay in xadka laga soo baxay, tallaabooyin dheeraad ah oo loo baahan yahay in aad qaado ma jiraan. Waxaa weli jira suuragalnimada in si ku nasiibso ah laguugu soo xusho si laguugu qoro haddii uu boos ka banaanaado barnaamijka. Waxaad heli doontaa ogeysiis xaq-u-yeelasho haddii laguugu soo xusho isqoritaan loo marayo habka war-isgaarsiinta ee aad doorbidayso (email ama boosto).

Haddii aadan codsan, buuxi codsigaaga Apple Health Expansion si laguugu tixgeliyo haddii uu boos ka soo bannaanaado iyo si aad wax uga oggaato ikhtiyaarada kale ee caymiska.

Sideen ku codsadaa Apple Health Expansion?

Waxaad haysataa dhowr ikhtiyaar oo aad ku codsaneyso ama ku cusbooneysiinayso caymiska adigoo taageero ku helaya in ka badan 200 luuqadood.

Haddii ay da'daadu u dhaxeeyso **19 ilaa 64 sano jir**:

- **Barta Internet-ka:** Booqo [Washington Healthplanfinder](#). Dooro badhanka "Hadda Codso/Apply Now".
- **App-ka telefoonka gacanta:** Soo degso [ablikeeshanka WAPlanfinder app](#). Dooro "gal/sign in" ama "akoon samee/create an account".
- **Telefoonka:** Ka wac [Washington Healthplanfinder](#) Xarunta Taageerada Macmiilka 1-855-923-4633.
- **Waraaq:** Soo gudbi [Codsiga caymiska daryeelka caafimaadka \(18-001P\)](#).
- **Shakhsi-ahaan:** Shaqaalaha degaanka kaasoo, adigoo bixin wax kharash dheeraad ah, kaa caawin kara in aad codsato caymis caafimaad.
 - [Caawimaadda isqoritaanka degaanka](#)

Waxaa laga yaabaa in lagaag baahdo bixinta dokumentiyo aad ku xaqiijinayso aqoonsigaaga [Washington Healthplanfinder](#). Eeg liiska [dokumentiyada la aqbali karo](#) ee aad adeegsan karto si aad ugu caddeyso aqoonsigaaga. Hagayaasha waxay xaqiijin karaan aqoonsigaaga iyagoon kaaga baahan in aad dokumentiyo soo geliso [Washington Healthplanfinder](#).

Haddii ay da'daadu tahay **65 ama ka weyn**:

- **Barta Internet-ka:** Booqo [Washington Connection](#). Dooro "Hadda Codso/Apply Now."
- **Waraaq:** Soo gudbi [Codsiga loogu talagalay caymiska daryeelka muddada dheer/dadka waayeelka ah, indhoolaha, naafada \(HCA 18-005\)](#).
- **Telefoonka:** Codso codsi adigoo wacaya 1-877-501-2233.
- **Shakhsi-ahaan:** Booqo xafiiska degaankaaga ee [Waxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka \(DSHS\)](#).

Haddii lagu aqbal, waxaad kaarka adeegyada ProviderOne ku heli doontaa qiyaastii laba toddobaad gudahooda. Caymisku wuxuu bilaaban doontaa maalinta koowaad ee bisha codsiga la soo gudbiyay. Waxaad yeellan doontaa ikhtiyaar aad online-ka kaga xulanayso qorshe caafimaad ama waxaa si toos ah laguugu qorayaa qorshe.

Haddii aad bilowday codsigaaga oo aadanna hubin in uu buuxo iyo in kale, waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad akoonkaaga gasho ama la xiriir mid ka mid ah kooxaha adeegga macmiilka ee kor ku xusan si aad u eegto xaaladda codsigaaga.

Ogow: Hal codsi oo kaliya ayaa loo baahan yahay in la soo gudbiyo. Haddii uu qof codsado Apple Health Expansion loona diido iyadoo sababtu tahay in xadka isqoritaanka la gaarey, ma jiraan tallaabooyin dheeraad ah oo looga baahan yahay in ay qaadaan.

Ma u baahanahay kaar aqoonsi (ID) si aan u codsado Apple Health Expansion?

Maya, lagaagama baahna in aad aqoonsi bixiso si aad u codsato. Haseyeeshee, aqoonsi bixinta waxay kuu fududeynayaa in aad aqoonsigaaga ku xaqiijiso nidaamyada codsiga.

Meeqaa qofood ayaa ku qoran Apple Health Expansion?

HCA waxay ku qori doontaa ilaa iyo 13,000 qofood Apple Health Expansion. Tiradan way isbeddeli kartaa maadaama HCA uu xaqiijiyo in aan hoos joogno miisaaniyadda barnaamijka.

Waxaan ku dhiirrigelinaynaa shakhsiyadka daneynaya in ay codsadaan [in ay isku qoraan cusboonaysiinta email-ka](#) iyo in aad eegto [Ogeysiisyada isqoritaanka](#) si aad u hesho cusboonaysiintii ugu dambaysay. Waxaad soo diri kartaa su'aalo ku saabsan waxa ay tani uga dhigan tahay adiga iyo qoyskaaga, iyo waxa la filayo bilaha soo socda ee ku xiga [Apple Health Expansion inbox](#).

Haweenka uurka leh miyaa xaq u leeyihiin Apple Health Expansion?

Haddii aad codsato Apple Health Expansion oo aadna sheegto in aad uur leedahay, waxaad ikhtiyaar u leedahay in aad lahaato caymiskaaga hadda, haddii kale waxaa lagu wareejin doonnaa Apple Health ee loogu talagalay haweenka uurka leh. Barnaamijkan wuxuu bixiyaa caymis la siiyo haweenka uurka leh oo dakhligoodu yahay ama ka hooseeyo Apple Health heerarka dakhliga.

After-Pregnancy Coverage (Caymiska Uurka-Kadib) wuxuu caymiyaa shakhsiyadka muddo 12 bilood ah ka-dib marka uu uurka dhammaado. Barnaamijyadan ayaa la heli karaa iyadoo aan la eegayn jinsiyadda ama xaaladda socdaalka. Wax badan ka ogow [hca.wa.gov/apple-health-pregnant-individuals](#).

Miyay Apple Health Expansion ka mid yihiin qaxootiga sida sharciga ah ku joogo?

Haddii aad qaxooti tahay, waxaa lagaa dhaafey xadka shanta-sano waxaadna xaq u yeellan kartaa barnaamijyo Apple Health kale. Tani waxay kaa dhigaysaa in aadan xaq u lahayn Apple Health Expansion.

Waxaan leeyahay xaaladda Tallaabada Dib-loo-dhigay ee Imaanshiyaha Carruurnimada (DACA). Miyaan xaq u leeyahay Apple Health Expansion?

Haa, waxaad codsan kartaa oo lagu ansaxin karaa Apple Health Expansion xaaladda DACA haddii aad ka soo baxdo shuruudaha xaq-u-yeelashada.

Sidee ayuu hagidda xeerka DACA ee 1-da Nofembar, 2024, saameyn ugu yeeshaa Apple Health Expansion?

Si waafaqsan xeerka cusub, laga bilaabo 1-da Nofembar, 2024, qaatayaasha DACA waxaa loo tixgelin doonaa in uu si sharci ah ku joogaan taasoo ka dhigaysa in ay xaq u yeeshaan kabka federaalka si ay u codsadaan QHP iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*. Qayb ka mid ah hirgelinta ahaan, Apple Health Expansion qaatayaasha DACA ee xaq u leh waxay ka guuri doonaan min Apple Health Expansion ilaa caymiska QHP ee la kabo.

- **Ogow:** Taariikhda hirgelinta dhaba ah waxaa saameyn kara shuruucda federaalka iyo/ama jadwalada hirgelinta gobolka.

Marka la hirgeliyo, qaatayaasha DACA waxay ku tilmaami karaan muwaadiniinta (Maya) iyo dadka sida sharciga ah ku jooga (H).

- Macaamiisha ayaa ka-dib laga eegi doonaa QHP-yada ku dabaqma, kabka federaalka iyo gobolka iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*.

Qaatayaasha DACA waa in ay weli codsadaan caymiska iyagoo soo gudbinaya codsi la soo marsiinaya *Washington Healthplanfinder*. Qaatayaasha DACA waxay heli doonaan macluumaad dheeraad ah ka hor bisha Nofembar 2024.

Waa maxay ikhtiyaarada kale ee aan heli karo muhaajir ahaan haddii aanan xaq u yeellan Apple Health Expansion?

Waxaad haysataa ikhtiyaaro daryeelka caafimaadka ah haddii aad tahay muhaajir aan xaq u lahayn Apple Health Expansion ama isku-daya in uu isku qor oo uusan awoodin iyadoo sababtu tahay in barnaamijka uusan boos ka bannaanayn. Muhaajiriinta waxay codsan karaan ikhtiyaarada kale ee caymiska caafimaadka ee laga heli karo *Washington Healthplanfinder* loona yaqaanno qualified health and dental plans (QHP/QDP) (qorshayaasha caafimaadka iyo ilkaha ee xaq u leh). Washington Health Benefit Exchange **Ka dhaafidda federaalka/federal waiver (1332 waiver)** ee sugan ee u oggolaada shakhsiyaadka aan lahayn xaaladda socdaalka federaalka ee la aqoonsan yahay in ay iibsadaan QHPs loo marayo *Washington Healthplanfinder*.

Waxaa lagu tixgelin karaa ikhtiyaarada kale ee caymiska daryeelka caafimaadka ee loogu talagalay muhaajiriinta, oo ay ku jiraan kuwa aan ka soo bixin xadka-shanta-sano. Ikhtiyaarada caymiska ee la heli karo waxaa ka mid ah:

QHPs iyo QDPs la heli karo iyadoo loo marayo *Washington Healthplanfinder*

- Dadka daneynaya waa in ay codsadaan iyagoo adeegsanaya ***Washington Healthplanfinder***.

Barnaamijyada Apple Health kale

- [Apple Health for Kids](#)
- [Apple Health for pregnant individuals](#)
- [Caafimaadka Degdegga ah \(AEM\)](#)
- [Adeegyada Daryeelka Caafimaad \(MCS\)](#)
- [Family Planning Only \(Qorsheynta Qoyska oo Keliya\)](#)

Ma tahay in aan bixiyo caddeynta dakhligeyga markaan codsado Apple Health Expansion?

Looma baahna in aad bixiso caddeynta dakhligeyga markaad codsato Apple Health Expansion. Waxaad heli kartaa warqad kaa codsaneysa in aad bixiso caddeynta dakhliga ka-dib isqoritaanka. Warqaddan waxay wadaagi doontaa nooca dokumentiyada ee ay tahay in aad bixiso. Haddii aad hesho waraaq kaa codsaneysa macluumaad dheeraad ah waxaad u baahan doontaa in aad ka jawaabto si aad uga fogaato xiritaanka caymiskaaga.

Waxaan helay codsi lagu xaqiijinayo dakhligeyga aniga oo ku nool qoys shakhsiyad badan ka kooban. Yay tahay in aan dakhligiisa soo gudbiyo?

Loogu talagalay shakhsiyadka da'doodu tahay 65 iyo kuwa ka weyn:

- Xaq-u-yeelashadu waxaa lagu saleyn doonaa dakhliga shakhsiga ama ninka/xaaska ay helayaan ama ay shaqeysanayaan. Xaaladda xareynta canshuurta ee shakhsiga ma ahan cunsur xaq-u-yeelasho loogu talagalay shakhsiyadka da'doodu tahay 65 iyo kuwa ka weyn.

Loogu talagalay shakhsiyadka da'doodu tahay 19-64:

- Xaq-u-yeelashada waxay ku saleysan tahay macluumaadka dakhliga ee dhammaan dadka waaweyn iyo dhammaan carruurta ee haysta dakhli ku filan oo keeni karta in looga baahdo in ay canshuur celin soo gudbiyaan.

Maxay tahay sababta Apple Health Expansion macaamiisha loogu qoro daryeelka la maareeyo iyadoo macaamiisha barnaamijyada kale ee uu gobolku maal geliyo Apple Health aan loogu qorin?

Qaab-dhismeedka barnaamijka ayaa kala duwan oo ku xiran dadka loo adeegay iyo isha maal gelinta.

Waa maxay qorshayaasha Apple Health aan wax ka dooran karo?

Haddii aad isku-qorto Apple Health Expansion, waxaad wax ka dooran kartaa mid ka mid ah qorshayaashan caafimaadka ee soo socda:

- Community Health Plan of Washington
- Coordinated Care
- Molina Healthcare
- UnitedHealthcare Community Plan

Eeg **Apple Health Expansion khariidadda goobta adeegga** si aad u aragto qorshayaasha caafimaadka degmadaada lagu bixiyo.

Haddii macmiilka uusan mid dooran, waxaa si toos ah loogu qori doonaa qorshaha caafimaadka laga heli karo degmadooda.

Goormee ayuu caymiskeyga bilaabanayaa ka-dib marka la ii oggolaado Apple Health Expansion?

Waxaa lagu qori doonaa maalinta koowaad ee bisha aad caymiska codsatay.

Maxaa dhacaya haddii la igu qoro Apple Health Expansion oo aan uur yeesho?

Isbeddellada, oo uu ka mid yahay uurka ku soo sheeg 30 maalmood gudahooda. Tani waxay xaqiijinaysaa in aad ku qoran tahay barnaamijka saxda ah. Haddii aad ku qoran tahay Apple Health Expansion oo aad uur soo sheegto, waxaad u wareegi doontaa Apple Health oo loogu talagalay Shakhsiyadka Uurka leh. Barnaamijkan wuxuu bixiyaa caymis la siiyo haweenka uurka leh oo dakhligoodu yahay ama ka hooseeyo Apple Health heerka dakhliga.

Sidee macaamiisha looga soo wareejinayaa barnaamijkooda hadda iyadoo loo wareejinayo Apple Health Expansion?

Macaamiisha u wareegaysa Apple Health Expansion kana soo wareegaysa AEM, Apple Health ee loogu talagalay Haweenka Uurka leh, ama QHP waxay heli doonaa fursad ay ku dooranayaan qorshe caafimaad. Haddii macmiilka uusan mid dooran, waxaa si toos ah loogu qori doonaa qorshaha caafimaadka laga heli karo degmadooda.

Isticmaalka caymiskaaga

Ma kharashbaa kaga baxaya macaamiisha in ay isku qoraan ama ay isticmaalaan Apple Health Expansion caymiska?

Maya, Apple Health Expansion caymisku waa bilaash. Ma bixin doonto kharashaadka jeebka laga bixiyo ama lacag-bixinta la wadaago marka aad helayso adeegyada la caymiyay Apple Health Expansion.

Waa maxay adeegyada lagu caymiyay Apple Health Expansion?

Apple Health Expansion wuxuu caymin doonaa adeegyada caafimaadka jirka iyo midka dhaqanka, gaadiidka caafimaadka ee xaaladaha aan degdegga ahayn, iyo adeegyada tarjumaanka. Adeegyada iyo taageerada muddada-dheer looma caymin si waafaqsan Apple Health Expansion.

Eeg liiska dhammeystiran ee **adeegyada ay bixiso Apple Health**.

Macluumaadkeyga miyaa la ilaalin doonaa?

Apple Health Expansion isticmaal Apple Health heerarka ilaalinta iyo asturnaanta xogta barnaamijka si aad u xaqiijiyo macluumaadka iyo aqoonsiga macaamiisha in ay sir ahaadaan. Eeg [ogeysiiska habdhaqannada asturnaanta ee HCA](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Amarka maxkamadda ama shuruudaha kale ee sharciga ee maqan, HCA lama wadaago macluumaadka macmiilka hay'ad socdaal kasta, oo ay ka mid tahay hay'adda Fulinta Amuuraha Socdaalka iyo Kastamka (ICE) ama hay'adaha kale federaalka. Xaq-u-yeelashada Apple Health Expansion waxaa ka reebban imtixaanka lagu go'aamiyo in shakhsiga uu ku tiirsanaan doonno dheefaha dowladda (public charge test). Eeg [ogeysiiska si aad wax badan u oggaato \(Español\)](#). Haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo ku saabsan sida codsiga Apple Health Expansion uu raad ugu yeellan karo xaaladda socdaalkaaga ama fursadaha aad ku noqonayso deggane joogto ah ama muwaadin, la xiriir qareen socdaal.

Macluumaad dheeraad ah

Halkeen ka oggaan karaa wax badan oo ku saabsan Apple Health Expansion?

- **Apple Health Expansion xaashida macmiilka** (lagu heli karo **15 luuqadood**)
 - Eeg warqaddan daabacan si aad wax uga oggaato adeegyada la caymiyay, faahfaahinnada xaq-u-yeelashada, iyo halka laga codsanayo.
- **Online-ka:** hca.wa.gov/apple-health-expansion

Haddii aad caawiso Apple Health Expansion codsadaa ama aad dooneyso in aad gacan ka geysato faafinta warka waxaad adeegsan kartaa agabkan war-isgaarsiineed ee soo socda. Kuwani waxaa ka mid ah:

- **Apple Health Expansion qalabka isgaarsiinta**
 - Isticmaal qalabkan si aad u dalacato ama u wadaagto farriimaha muhiimka ah oo nooca dhageystaha ah, kheyraadyada iyo daabacaadaha macmiilka, hagidda sumadda iyo luuqadda, iyo [qalabka baraha bulshada](#).
- Siminaarro (webinars) macluumaad lagu wadaago
 - Apple Health Expansion siminaarrada iyo slides-yada soo bandhigyada waxaa laga heli karaa hca.wa.gov/webinar.
- Isdiiwaangeli si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay
 - Shakhsiyadku waxay [isdiiwaangeli Apple Health Expansion](#) email ku soo diri karaan wararkii ugu dambeeyay!

Su'aalaha la xiriira Caymiska Caafimaadka Socdaalka QHP/QDP

- Haddii aad qabto su'aalo ku sabsan sida loo codsado QHP/QDP ama Cascade Care Savings:
 - Email ImmigrantCoverage@WAHBexchange.org
 - Booqo [Washington Healthplanfinder mareegaha](#)
 - Ku eeg [Af-Isbaanish](#)